Casriyeeynta Dugsiyadda:
Dib-udhiska Barnaamijyadda Dugsiyadda Guud ee Portland.

November 8, 2010

Dugsiyadda Guud ee Portland waxay u adeegaan 47.000 oo arday oo kala dhigta 86 dugsiyadda xaafaddaha iyo kuwa gaadhka ah, iyadii oo ay dhinac socdaan barnaamijyadda gaadhka ah iyo dugisyadda badiilka ah. Dugsiyadda xaafadaha waxaa loo qaabeeyey aagaga kuwan oo dugsiyadda hoose, K-8 iyo kuwa dhexe ay dhacaan islamarkaana biidhiyaan dugsiyadda sare ee beesha. Dugsiyadda gaadhka ah waxa ay dhacaan qaybo badan oo magaaladda ah.

Inta badan dhismayaasha Dugsiyadda Guud ee Beesha waxaa la dhisay ka hor 1960kii – in kale oo badan waxay jiraan in ka badan 65 sanadood weligoodna dib looma eegin. Degmaddu waxay soo jeedisay barnaamij dib loogu dhisayo sideed dugsi; lagu kordhinayo badbaadada ubadka islamarkaana loogu samaynayo gegtir qaabeed tan oo ku jeeda dhamaan dugsiyadda kale, iyadii la saxartirayo bii'adda barashadda ee dhamaan dugsiyadda oo dhan sidoo kale iyadii oo la gigtirayo laababka sayniska, goobaha waxbarashadda dhismaha jirka iyo in kale.

Ujeedada Dugsiyadda Guud ee Portland waa in ay ardaydu ka qalinjebiyaan iyadii oo ay diyaar u yihiin kuliyadaha, shaqadda iyo noloshooda kale. PPS waxay dadaal ugu jidhaa sidii ay u hirgelin lahayd manhaj tayo sare leh oo ay helaan ardayda fasal walba oo dugsiyadda degmadda ah. Bii'ad aad u horumarsan oo wabarasho, iyo technologyad casri ah oo taabagelisa tayaynta manaahijtaa iyo najaxa ardayda.

Macluumaad dheeri ah, fadlan eeg taxanaha dowrka cabir ee dhamaystiran iyo khariidada mashaariicda lasoo bandhigay. Xogta kale macluumadka waxaa laga heli karaa www.pps.k12.or.us guji "School Modernization". Waxaad kale oo fariin udiri kartaa schoolmodernization@pps.k12.or.us ama wac 503-916-2801

Dugsiyadda Guud ee Portland waxay bilaabayaan dadaal ku jeeda dib-u-dhiska iyo dayactirka dhamaan dhismayaasha dugsiyadda 20ka illaa iyo 30ka sanno ee soosocda. Iyadii oo adeegsanaya hal-abuurka "bixi hadba inta aad adeegsato" amaah iyo dulsaar mudo dheer ah, dowrka deberidu waxa uu keeni karaa helida dhaqaalaha ku baxaya si loo cadilo dib-uqaabaynta dhamaan dugsiyadda degmadda

Xidhmadda Tayeynta

Cabirka jogtaynta ee doorashadii May 2011waxay u ogolaanayaan codeeyayaasha in ay go'aan ka gaadhaan barnaamijkan dib-u-dhiska. Heerka cabirka, waa $2 kunkii $1.000 ee qiimaha sheyga, waxa uu kharash ahaan ku kacayaa $25 bishii qoysaska heerka dhexe, imika waxaa lagu qiimeeyey #147,500(in ka yar kal badh qiimaha suuqa). Shaqaddu waxay bilaaban doontaa bilowga xagaaga 2011 xidhmadda waxaa ka mid ah:

1. Dayactirka dhismaha dugsiga iyo heerka badbaada guud ee mar keliya.
Dhamaan 85ta dugsi ee Dugsiyada Guud ee Portland waxa uu heli doonaa dayactir guud oo mar keliya:

- Saxartirka xaaladda dugsiyadda sida bedelidda saqafka iyo nidaamka diirinta hawadda, iyo dayactirka adeegsiga ardayda iyo dadka waawayn ee itaalka daran
- Kordhinta badbaadada iyo sugnaanta ubadka iyadii oo lagu xidhayo nidaamka digniinaha, lagana dhigayo kan dhulgariirka mid cusub oo xiliga la saanqaadi kara, waxaa kale oo laga dhigaya in ubadku ay si badaado qabta kusoo galaan kadinka dugsiga

2. Dib-u-dhiska sadex dugsiyada sare ah, shan dugsiyadda hoose ah, iyo dugsiyadda K-8 ee kuwan oo ay magaaladu yeelan doonto.
Sadexda dugsiyadda sare ah dib baa loo dhisiyaa oo loo horumarin doonaa, si markaa ardayda Dugsiyadda Guud ee Portland ay u helaan qalab casriyeeysan oo isku mid ah kuwan oo dhamaantood la saanqaadi kara xiliga iyo bii'adda waxbarasho sida ay ardayda dugsiyadda deriska ahuba u haystaan dhismayaasha cusub.

Sadexda dugsiyadda sare ee lasoo jeediyey in dib-u-dhis lagu sameeyo waxaa weeye Cleveland, Jefferson iyo Roosevelt. Marka lagu daro, shaqadda qorshaynta iyo qaabaynta waxay dhamaystirmi doontaa afar dugsiyo sare, sidaa awgeed Lincoln degmadu judhiiba waxay qaybin kartaa dhismayaasha cusub ee dabayaala dowradda la qorsheeyey.

Dugsiyadda Hoose iyo K-8 ee dowradda dhaqaalahoodu waa: Fubion, Laurelhurst, Markham, Marysville iyo Rigler.

Dugsi walba oo kuwa deriska ha waxaa dib loogu dhisi doonaa tilmaamo gaadh ah, marka lagu daro bedka, si markaa ay ucaawiso barnaamijka la tilmaamay ee heerka fasaladdaa lagu talagalay.

3. Dayactirka qaybaha fasaladda ee bi'aadda barasho iyo qalab siyaadda ah oo lagu caawinayo dugsiga

- Fasaladda sayniska waxaa la horumarin doonaa iyadii oo si gooni ah oo saxartirayo dhanka technology-ga kuwan oo gaadhaya 38 Dugsiyadda PPS.
- Garoomo daboolan oo lagu ciyaaro loo qaabeeyey waxbarashadda jidhka ee dibadda iyo adeegsiga qalabka jirdhiska kuwan oo la gaadhsiin doono illaa iyo 33 dugsiyadda degmadda ah.
- Lixda dugsiyadda sare ee aan dib-u-dhiska lagu samayn waxay yeelan doonaan dayactir xagga fasaladda ah si ay u haqabtirto baahidda barnaamijyadda imika la qabatimay, manhaj guud oo dhamaystiran. Sidoo kale waxay yeelan doonaan saxartir dhinacyadda dugsiyadda ahsida qurxinta dhulka, dhaqaalaha miraha ee dayactirka dhulka, nalalka, barxadaha fasaladda iyo cusboonaysiinta kadinadda laga soo galo dugsiga.

4. Xisaabtanka iyo maamulka dhaqaalah.

Maamulka dhaqaalaha ku baxaya dayactirkaa waxa shardi u ah kaydka suuragalka ah, iyo dib ugudida amaahdii hore si loo saxartiro heerka dhaqaale ee degmadda.

Waxaa lagu sharfay illaalaynta gar-soojeeditaa, iyadii aysan meesha ka marnayn illaalayn joogta ah oo ay ku dhaqaaqaan Gudiga Dugsiga ee Dhaqaalaha, xisaabtanka iyo howlgaladda iyo Gudiga Muwaadiniinta Dib-u-eegida Miisaaniyadda. Xisaabtanka Sanadlaha ah ee dhaqaalah waxay hubin doonaan sida howshan dhaqaale ahaan loo gutay, halka dhamaan warbixinadaas iyo la xisaabtankaa dib loogu baahin doono shabakadda caalamiga ah ee PPS.

Sal-xidhka Mudnaanta.

Dib-u-eegid guud oo qeexaysa hoos udhaca dhamaan dhismayaasha dugsiyadda PPS – kuwa cusub ee imika la dhisay Rose Park Elementary isagu kuma jiro – iyadii oo la ogaaday in ay tahay mid dhaqaale badani ku baxay sababta isagii oo si dhan kelidii dib-u-dhis loogu sameeyey halkii xooga la saari lahaa hoos udhaca markiiba hal un. Dugsiyadda Guud ee Portland ma qaadan doono in ka badan umaamulidda si dhiifoon iyo la xisaabtan muuqda. Hogaanka PPS waxay adeegsan doonaan nidaamkan kala hormarinta dib-u-dhiska dugsiga:

- **Dib-u-dhiska dugsiyadda si loo qaato in walba oo arday ah oo suuragal ah.** Meelmarinta Dib-u-dhiska dugsiyadda si loo qaato in walba oo arday ah oo suuragal ah. Iyadii oo si gooni ah loo eegayo heerka fasalka halka bii'ad waxbarasho ay tahay mid si wanaagsan loo dayactiray marka la barbardhigo dugsiyadda deriska ee degmadda.
- **Ujihaynta dhismayaasha dugsiyadda bahida adag loo qabo.** Sababta xaaladda muuqooda, da'da iyo heerka dayactir la'aaneed. Muuqa Heerka Dhismaha (FCI) ayaa qiimaynaya hoos udhaca kharashka jihaynta dhismayaal gaadh ah marka loo eego kharashka dib-uqaabayn dhamaystiran. Iyadii oo si gooni ah loo eegayo astaanta nambaradda muujinaya baahida sare
- **Dyactirka dugsiyadda ee qayb walba oo ka mid ah dugsiyadda degmadda.** Joqoraafiga kala duwanaanshaha ayaa xadidaya sinaanta iyo cadaaladda, waxay kaloo kaabaysaa hubinta in "gudhguudhka goobta" meel udhow aqalka ayaa loo adeegsan doonaa dugsi ahaan si ay udhigtaan ubadka inta dhismuhu socdo.

Saamaynta Dhaqaalaha

Iyadii oo la eegayo khibradii laga dhaxlay degmooyinka kale, dayactirka dugsiyadda waxay kordhinayaan qiimaha hantidaa iyo xaafaddaha magaaladda ee qoysaska iyo ubadka. Sidoo kale waxay samaynaysaa kumanaan kun oo shaqo oo kusoo biidha qolyaha ka shaqaysta ganacsigaa, iyo saamayn dhaqaale oo gaadhaysa $1 bilyan tan oo ka dhigan lacag ku wareegaysa ganacsiyadda maxaliga ah iyo qoysaska.